



## (Ilaahay waa u kaadiyaa daalimka markuu qabtase ma siidaayo)

Abii Muusa Allaha ka raali ahaadee wuxuu dhahay: Rasuulka Ilaahay scw ayaa yiri: (Ilaahay waa u kaadiyaa daalimka markuu qabtase ma siidaayo), wuxuu yiri: ka dibna wuxuu akhriyey: {waa sidaa uun markuu rabigaa qabto magaalooyin dulmi falay, Rabigaa qabashadiisu waa mid aad u daran} [huud:102].

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiiye-in lagu dhegenaado oo lagu socdo dulmiga sida macsida iyo shirkiga, oo laga dulmiyo dadka xaqooda, Ilaahay koreeyee, wuu u kaadiyaa qofka daalimka ah cimrigana wuu u dheereeyaa, maalkiisana wuu u daayaa oo ciqaabta kuma dedejiyo, haduu towbo keeni waayose wuu qabtaa oo masiidaayo umana dhaafu dulmigiisii badan awgi. Ka dibna wuxuu akhriyey Nabigu scw -: {Waa sidaa qabashada Rabigaa markuu qabto magaalooyin dulmi falay, Ilaahay qabashadiisu waa mid oo aad u daran} [huud:102].

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5811>

